

Qafiifinta kirada

Su'aalaha badanaa leys weydiyo | Abriil 2020

Haddii aad tahay qof bixiya kirada-ku-saleysan-dakhliga ama daggane bixiya kirada suuqa kaasoo lumiyay dakhliga ka soo gala shaqada taasoo ugu wacan COVID-19, waxaad xaq u leedahay brograamka qafiifinta kirada. Haddii uusan kaa lumin dakhliga, xaq uma lihid, waxaadna bixin doontaa kirada oo buuxda taasoo lagaa rabo maalinta kowaad bil kasta.

Maxaa loola jeedaa "qafiifinta kirada"?

Waxaan u qafiifin doonaa dagganeyaasha lumiyay dakhliga shaqada taasoo ugu wacan COVID-19. Waxaan dib u xisaabi doonaa bixinta lacagta kirada ay bixin doonaan reeraha RGI ay saameysay iyo waxaan reeraha u ogolaan doonaa in ay gadaal u dhigaan bixinta qeyb ka mid ah kiradooda ilaa muddo saddax bil.

Sidee ayaad u kaalmeyn doontaa reeraha RGI?

Marka laga hadlo reeraha RGI, TCHC waxay dib u xisaabi doontaa kiradaada taasoo ku saleysan isbaddalka ku dhacay dakhliga kaa soo gala shaqada.

Hawshaan miyay qaadan doontaa booska fiirinta kiradeyda sannadka?

Maya. Hawshaan waxaa loogu talagalay reeraha lumiyay dakhliga shaqada taasoo ugu wacan COVID-19 ee raba in ay dalbadaan brograamka qafiifinta kirada.

Horaanta Abriil, reer kasta oo daggan guryaha TCHC, waxaa loo soo diray warqado waxaana loo soo raaciyay macluumaad. Inkastoo warqadaha la socdaan foomka Dakhliga Reerka iyo Fiirinta Hantida (Household Income and Assets Review), MA aha fiirinta kirada sannadka ee reerka.

Qafiifinta kirada TCHC – Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo (FAQ) – Abriil 27, 2020

Warqadahaada fiirinta sannadka ee rasmiga ah waxaa loo diraa reerkaada lex bil ka hor inta aan la gaarin sannad guurada kiradaada. Warqadaha waxaa ka mid ah warqadda horudhaca oo tafatiran si laguugu sheego in tani tahay fiirinta sannadka. Waxay kaloo sheegi doontaa marka leyska rabo foomamka iyo sida loo helo kaalmo ku saabsan buuxinta foomamka.

Sidee ayaad u kaalmeyn kartaa reeraha kirada suuqa?

Reeraha kirada suuqa ay saameeyso, sida reeraha kirada awoodaan, TCHC waxay siin doontaa fursado ay gadaal u dhigaan qeyb ka mid ah kiradooda. Reeraha waxay dooran karaan in ay bixiyaan hal meel-saddax meel, bar ka bar ama saddax-rubac kiradooda bilaha Abriil, Maajo iyo Juunyo, kaddibna waxay baaqiga ku biixin doonaan muddo lex ilaa sideed bil oo ah lacag bixin dheeraad ah, laguna darro kirada caadiga.

Yaa xaq u leh brograamkaan?

Waxaa xaq u leh dhamaan dagganeyaasha muujin kara in ay lumiyeen dakhliga ka soo gala shaqada taasoo ugu wacan COVID-19. Waxaan adeegsan doonaa habab kala duwan xagga reeraha RGI iyo reeraha bixiya kirada suuqa (sida reeraha kirada awoodaan). Dagganeyaasha aan luminin dakhliga ka soo gala shaqada xaq uma laha brograamka qafiifinta kirada.

Sidee ayaan ku caddeyn karaa in aan xaq u leeyahay?

RGI iyo reeraha kirada suuqa labadaba waxay u baahan yahiin in ay keenaan warqado taageersan dakhliga ka lumay. Waan kula shaqeyn doonaa haddii aadan haysanin warqado, hase ahaatee waxaa loo baahan yahay in aad soo gudbisid warqadaha isla marka aad heshid si aad xaq ugu sii yeelatid brograamka.

Haddii warqadaha aad keentid muujiyaan in kiradaada kor loo qaado, waxaa dib laguugu soo dallici doonaa kirada loo baahna in aad bixisid.

Qafiifinta kirada TCHC – Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo (FAQ) – Abriil 27, 2020

Aniga waxaan ahay daggane awooda kirada. Ma heli karaa kaalmo?

Haa Haddii aad lumisay dakhliga kaa soo gala shaqada taasoo ugu wacan COVID-19, waxaad xaq u leedahay fursadaha gadaal u dhigidda kirada aan siino reeraha kirada suuqa.

Sidee loo fulliyaa? Sidee ayaan ku dalban karaa?

Waa in aad buuxisid foomka la xariiro xaaladda kiradaada una soo celisid TCHC, adiga oo soo raaciya warqadaha xaqiijiya dakhligaada ama shaqada kaa luntay. Sidoo kale, reeraha RGI waa in ay dhamaystiraan iyo waa in ay soo gudbiyaan foomka Dakhliga Reerka iyo Fiirinta Hantida (Household Income and Assets Review) bacdamaa ay tafatiri doonto heerka dakhligaada cusub.

Reeraha RGI waxay aqoonsan doonaan foomkaan laga soo qaaday hawsha fiirinta sannadka marka lagu soo diro adiga lana soo raaciyo warqadda horudhaca.

Xaggee ayaan ka heli karaa foomamkaan?

Waxaad heli kartaa foomka marka aad:

- Soo wacdid Xaruntena Daryeelka Macaamilka (Client Care Centre), taasoo furan 24 saac, telefoonka **416-981-5500**
- Email u dirtid help@torontohousing.ca
- Foomka kala soo baxdid torontohousing.ca/covid-19
- Kala soo baxdid warqadaha TCHC ee loo diray reer kasta horaanta bisha Abriil 2020

Xaggee ayaan ka heli karaa macluumaad badan?

Xaruntena Daryeelka Macaamilka (Client Care Centre) waxaa laga heli karaa 24 saac maalin kasta, 7 maalin todobaadkii, bogga internetka help@torontohousing.ca ama telefoonka **416-981-5500**.

**Qafiifinta kirada TCHC – Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo (FAQ) –
Abriil 27, 2020**

Waxaan kaloo soo gelinay macluumaad ku saabsan COVID-19, sida talooyinka ku saabsan ka-hortagga, lagana helo torontohousing.ca/COVID-19.

—dhamaad—